

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA - AFIS

Xeerka lamba. 108 ee 16 Nofember 1956 rep

**Baa'binta Xafiisyada Gaarka ah iyo Hey'adaha iyo Xafiisyada Arrimaha
Talyaaniga iyo Xafiiska Qorsheynta**

MAAMULAHAA

Kadib marki la arkay sharrciga Jamhuriyadda Talyaaniga lamba. 1301 ee 4 Nofember 1951 oo ansixin iyo fulin siin doonta Heshiiska Maamulida ee Dalka Somaliya iyo amaradda ka dambeyey.

Kadib markii la arkay sharciga lamba. 1 ee 7 Maayo 1956 ee la xiriira dhismaha Dowladda Somaliya;

Kadib marki la arkay dekreetada lamba. 78 ee 189 Maay 1956 ee ku saabsan dhismaha Xafiisyada gaarka ah;

Kadib markii la garoowsaday baahida loo qabo in la dhiso khab cusub ee Xafiisyada Maamulka Wasaayada Talyaaniga ee Somaliya iyadoo qaar ka mid ah howlaha lagu wareejin doono Dowladda Somalia oo horay xafiisyadaasi u haayeen;

Kadib markii la dhegeystay Guddenka Maamulka.

WAXAA LA AMRAY

Qod. 1

Waxaa la baabi'iyey Xafiisyadii Gaarka ahaa ee qod. 1 ee dekreetada lamba. 79 ee 18 Maayo 1956.

Qod. 2

Waxaa la dhisi Xafiis Arrimaha Talyaaniga iyo Xafiiska Qorsheynta.

Qod. 3

Xafiiska Arrimaha Talyaaniga wuxuu fulin doonaa arrimahaan hoos ku qoran:

- a) — Maamulidda shaqaalaha Dowladda Talyaaniga, madaniga iyo militariga ee ka shaqeeya Somaliya, maamulka shaqaalha lagu qoray heshiis shaqo-degaan sida uu qabo dekreetada lamba. 246 ee 24 Disember 1955, maamulidda shaqaalaha;
- b) — Maamulidda hoyga loo qondeeyey shaqaalaha ku tilmaaman faqradda a);
- c) — Adeega madaniga ee muwaadiniinta Talyaaniga;
- d) — Adeega askarta ee muwaadiniinta Talyaaniga;
- e) — Xaqijinta iyo sharchiyeenta qoraallada rasmiga oo loo isticmaali doono dalka dibediisa;
- f) — Takuleynta muwadiiniinta Talyaaniga iyo dib ugu celinta dalkooda;
- g) — Takuuleynta hey'adaha caymiinta, dhaqanka iyo isboortiga;
- h) — Basaboorada, iyo oggolanshada gelinta dadka Italiya;
- i) — Isku xirka Dowladda Somaliya iyo Hey'adaha Talyaaniga iyo wakiiladaha Talyaaniga ee dalka dibediisa ee soo galka dalka Somaliya;
- j) — Fulinta mushaaraadka iyo gunnoyinka Dowladda Talyaaniyga ee askartii hore, abaalmarintooda iyo kuwii ku curyaamay dagaaladii;
- k) — Howlgabnimada nooc kasta ee Dowladda Talyaaniaga oo lagu bixiyo Somaliya gudaheeda;

- l) — Magdhowga dhibaatoyinka dagaalka sida la xiriirta Heshiisa London oo lagu aqbalay sharciga lamba. 677 ee 30 Juun 1954;
- m) — Magdhaw ka soo arooray dacwooyinka ama heshiisyada dhexdhedaadiska ee la Maaulka Wasaayadda;
- n) — Qabuuraha Talyaaniga iyo Monumumento Ossario ee askarti Talyaaniga ee lagu dilay Somaliya;
- o) — Dugsiyada Talyaaniga ee Somaliya;
- p) — Mamulidda fursadaha waxbarashada iyo Rugta Waxbarashada Somaliya;
- q) — Hey'adaha caafimadka ee Talyaaniga;
- r) — Xiriirka **maamulk** ee Vicariato Apostolico oo la xiriira howlaha ku qoran faqradda f) g) n) o) q);
- s) — Amaradda, sharafeeynta ee Dowladda Talyaniga;
- t) — Maamulka ciidamadii cirka Talyaaniga ee Muqdisho;
- u) — Maamulka militariga Talyaaniga ee Muqdisho;
- v) — Adeega guud ee howlaha Xafiiska Maamulka Talyaaniga.

Qod. 4

Xafiiska Arrimaha Talyaaniga wuxuu fulinaya adeegyada oo uu isticmaali doono xubnaha teknikada ee Dowladda Somaliya.

Qod. 5

Xafiiska Qorsheynta wuxuu fulinaya arrimaha la xiriira:

- a) — Qorshaha maaliyada ee horumarinta dhulka iyo qaabkii loo fulin lahaa qorshahaas, iyo qaabka tirakoobka;
- b) — Howlaha toosinta Dowladda Talyaaniga ee misaanka sarifka qalaad ee Somaliya;
- c) — Taakuleynta maliyadeed ee Talyaaniga;
- d) — Misaniyadda hor dhaca ah iyo midkii la isticmaalay ee AFIS, xiririnta howlaha misaaniyadda ee Maamulka iyo Dowladda Talyaaniga;
- e) — Khasnadda lacagta socotoa iyo arrimaha la xirira deymaha, bangiyada iyo sarifka.

Qod. 6

Xafiiska Qorsheyntu wuxuu isticmaali kara si uu howlahiisu u fulaan hey'adaha maamulka, kuwaa kormeerka, kuwa fulinta iyo teknikada ee Dowladda Somaliya.

Qod. 7

Madaxa Xafiiska ee Arrimaha Talyaniga iyo Madaxa Xafiiska Qorsheynta waxaa lagu magacaabi doona dekreeto Maamulaha Guud.

Qod. 8

Waxaa lagu wareejiyey howlaha arrimaha dibedda Golaha Maamulka.

Qod. 9

Howlaha Xafiisyada Gaarka ah eek u qoran dekreetada lamba. 79 ee 18 Maay ee 1956 oo aan laqu qorin qodobada sare waxaa la wareegi doono Dowladda Somaliya.

Waxaa sidoo kale lagu wareejiyey Dowladda Somaliya arrimaha la xiriira:

- a) Madbacadda;
- b) warbaahinta radiyaha.

Qod. 10

Dekreetadaani wuxuu hirgeli doona 1 Jannayo 1957.

Muqdisho, 16 Nofember 1956.

Anzilotti

Waxaa la arkay lamb 672 ee 19 Nofember 1956

Madaxa Waaxda Xisaabakha: **Tura**

Waxaa la arkay lana diwaan geliey – diwan lamba. 20 bogga lamba. 114

Muqdisho, 19 Nofember 1956

Xisaabiyyaha Guud: **Spadaro**